Xogta waalidka ee ku jiritaanka TNReady

Taageerida ardaygaaga ee sanad dugsiyeedka 2016-17

(Warqaddan waxaa laga heli karaa bogga 3 aad ee warbixinta habaysan)

Gacaliye Waalidiin,
Tan iyo markii aan la wareegey xafiiska oo ahayd 2015 wada-sheekaysiga aan la yeeshay **in ka badan 10,000 macallimiin, arday, iyo waalidiin**, waxa ugu badan ee jawaab celin ahaan ay ii siiyeen ayaa waxay ahayd arrinka imtixaan qaadista hadalkan ayaa ugu badnaa ee la isoo gaarsiiyay-oo waana wax la iska garan karo. Aniga hooyo ahaan, macallimad ahaan, iyo sharci dejiye ahaan, waan ogsoonahay manfacyada qiimaynta iyadoo sidoo kale ay jirto baahida loo qabo in la hubiyo in ahmiyadda aan sii saarno in si wanaagsan aan wax u barno iyo waxbarashada fasalka dhexdiisa ka dhacaysa. Waa aragtiyadan oo dhan waa tan aan ku dul joogo si aan u wanaajin la'hayn qaabka aan u wajahno imtixaannada gobolka Tennessee.

Heerka gobolka marka laga eego, waxaan ka fiirinnaa sida ardayda, iskuullaadka, iyo degmo dugsiyeedka ay wax uga qabannayaan Barnaamijka Qiimeynta Faahfaahsan ee Tennessee [Tennessee Comprehensive Assessment Program (TCAP)], kaa soo uu ku jiro qiimaynta TNReady ee imtixaannada xisaabta, maadada Luadda Ingiriiska, maadada aqoonta bulshada, iyo sayniska. Maadama macalimiinta gobolka Tennessee ay uga shaqaynayaa in dhammaan ardayda oo dhan ay ku qalabeeyaan aqoonta iyo xirfaddaha ay u baahan yihiin, waa in aan xaqiijinna in aan caddayn karno dhammaan wixii gondaloolo ah oo wayn ee waxbarashada ardayda oo aan helo kobaca kala duwan ee iskuullada ay ku kala duwan yihiin-labada si markaas karti u siinno taageerada meelaha baahida ay ka jirto iyo in aan wax ka baranno iskuullaadka heerkoodu sareeyo. **TNReady waxay macalimiinta iyo waalidiinta ay u fidisaa jawaab-celin gaar ah iyo aragtida sawirka wayn ee in si wanaagsan loo fahmo sida ardayda horrumarkoodu uu u socdo iyo sida loo taageeri karo horrumarkoodu waxbarasho, laakin waxaa muhiim ah in la xusuusto in natiijooyinka ka soo baxa qiimaynta sannadlaha ah yahay mid ka mid ah sawirka kooban.** Marnaba ma ahan in natiijadaas ay wada-sheekaysiga noqoto.

Waxbadan ayaan ka baranay waayo-aragnimadeena TNReady ee sanad-dugsiyeedka 2015-16. Aniga guddi ahaan, waxaa iga go'an in aan abuuro imtixaanno wanaagsan-si markaas natiijooyinka ay u noqdaan kuwa waxtar lah-iyadoo sidoo kale la fiirinnayo fursaddaha lagu wanaajinnayo qaabka imtixaanka, wakhtiga, bixinta, iyo jadwallaynta. Waxaan fiirinnaynaa tallaabo dhaqso ah oo howshan ku aadan, sida aad ka arkayso qoraalkan. Gebi ahaan, imtixaanka gobolkeenu qiyaastii waa **boqolkiiba 30 waa ka gaaban yahay** marka loo eego 2015-16, kaa soo qiyaastii ah seddex-ilaa-iyo bar ka yar isku celcelis fasalka seddexaad. Sidoo kale waxaan **wajahaynaa imtixaannaad qatka internetka ah,** markaa sanadkan, ardayda dhigata fasalka 3-8 TNReady warqad ayay ku qaadan doonaan, degmo dugsiyeedka waxay haystaan ikhtiyaar ah in ardaydooda dhigata dugsiga sare ay qatka internetka ku qaadan karaan haddii iyaga iyo kuwa imtixaanka soo diyaariya ay muujiyaan in ay diyaar u yihiin. Kama dambeyskii, waxaan ka shaqaynaynaa in natiijooyinka aan ka dhigno kuwa tallaabooyin ay ka qaadan karaan waalidiinta iyo macalimiinta, oo ay ku jiraan tallaabooyin in laga qaato sanadyada dhowrka ah ee xiga si loo bixiyo xog dhaqso ah oo ka wanaagsan kii hore.

Hadafyadeenu waa isku wada mid: **waxaan doonaynaa in dhammaan ardaydeena oo dhan ay la yimaadaan xirfaddo ay dunida kaga shaqaystaa, kaa soo uu ku jiro fekirka muhiimka ah, wax qorista, iyo xallinta dhibaatada.** Waxaan doonaynaa inaan yareyno culayska imtixaan qaadista ee iskuulladeena. Waxaan doonaynaa in waalidiinta, macalimiinta, iyo ardayda aan u fidinno xog waxtar leh. Oo, waxaan doonaynaa in aan horey ugu socono in mid kasta oo idinka idin ka mid ah aad tihiin wadaageyaasha howshan- si ugu dambayntii iskuulladeena ay ugu noqdaan goob wax lagu barto oo waxbarasho wanaagsan laga helo oo ahmiyaddana saaro horrumarka carruurta. Mid kasta oo

carruurteena ka mid ah waxay xaq u leeyihiin in loo diyaariyo tallaabada xigta safarkooda waxbarasho, oo TNReady ayaa ah hal dariiq aan ku hubbinayno in loo diyaariyo fursaddaha wanaagsan ee hortooda jira in ay gaaraan.

Waad ku mahadsan tahay dhammaan waxaad maalin kasta ardaydeena aad u qabato oo dhan,
Dr. Candice McQueen
Guddoomiye ku Xigeenka Waxbarashada Tennessee

Su’aalaha Inta Badan La Isweydiiyo

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 1 aad ee warbixinta habaysan)

Sidee ayay xogtan iga caawin doontaa in qoyskeyga ay ugu diyaariso sanad dugsiyeedka?

Bogga soo socda, waxaad ka heli doontaa fahfaahin ku saabsan goorta ardaygaaga uu qaadan doono imtixaanka TNReady, inta wakhti ay qaadannayso qaadashada imtixaanka, noocyada su'aallo ee imtixaanka ku jiri doona, iyo intaa in ka badan. Hadafkeenu waa in ardaydaada maalin kasta u diyaarinno waxbarasho iyo in ay guulaystaan. Haddii aad qabto su'aallo dheeraad ah ka dib marka aad qoraalkan aad akhriso ka dib, fadlan la hadal macalinka ardaygaaga ama booqo bogga internetka ee **TNReady.gov.**

Maxay tahay sababta aan u leenahay imtixaannaadka gobolka?

Fasal kasta oo Tennessee ku yaala, waxbarista iyo waxbarashada waxay u eg tahay in ay kala duwan yihiin taasna waxay ku xiran tahay nooca buug, manhajka, iyo casharrada ay iskuullaadka iyo macalimiinta ay doorteen. Hoggaamiyayaasha gobolka waxaa mas'uuliyad ka saaran in ay hubiyaan fursaddaha dhowrka ah ee waxbarasho in ardaydeenu ay u diyaarinnayaan kulliyad, shaqo, iyo nolol.

Imtixaanaadka Gobolkeenu bartilmaameedyo dhowr ah ayuu qabtaa:

- Waxaa lagu ogaadaa horrumarka ardayga oo wixii la barayay uu ka samaynayo iyo sida uu ula barbardhigan yahay heerka fasal ee laga filayay
- Wuxuu waalidiinta iyo macalimiinta uu siinayaa sawir wayn oo ku saabsan sida horrumarka ardayga uu ula barbardhigmo marka loo fiiriyo ardayga asaaggiisa ah ee degmo dugsiyeed iyo gobol ahaan, oo ay ku jiraan kartida iyo fursaddaha kobaca ee ardayga
- Wuxuu dhisaa kalsooni iyo shaac ka qaadis ku aadan u diyaargaraynta ardayda ee dugsiga sare ka dib iyo shaqada ee kulliyadaha gobolka Tennessee, jaamacaddaha, iyo shirkad dad shaqaaleysiiya
- Wuxuu barayaasha uu ka caawiyaa inay wanaajiyaan cashar bixinta iyo dib ay u eegaan qaabka ay wax u barayaan
- Wuxu la xisaabtamayaa annaga in dhammaan wixii arday oo dhan aan si caddaalad ah ugu adeegno
- Wuxuu hoosta ka xariiqayaa iskuullaadka ardayda aadka u guulaysanayo

dhigtaan, si markaa annaga aan wax uga barano kuwa guulaysanaya

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 4 aad ee warbixinta habaysan)

Waa maxay TNReady?

Barnaamijka Qiimeynta Faahfaahsan ee Tennessee [Tennessee Comprehensive Assessment Program (TCAP)] wuxuu ahaa barnaamijka imtixaan qaadista ee gobolka tan iyo ilaa sannadkii 1988, oo waxaa ku jira imtixaanka TNReady, qiimaynta gobolka ee maadada luqadda Ingiriiska, xisaab, aqoonta bulshada, iyo sayniska. Maadaama gobolka hadda u wareegtay heerka waxbarasho oo ka sareeya dhowrkii sannadood ee la soo dhaafay, oo welina sii wadi doona, imtixaannadeena waxay noqdeen kuwa la jaanqaadaya waxyaabaha ay macalimiinta ay maalin kasta fasalladoodu casharrada ay ka bixiyaan.

TNReady waxaa loogu talagalay inay si sax ah u qiimayso wax fahamka ardayga, oo kaliya ma ahan xusuusta assaasiga iyo xirfaddaha imtixaan qaadashada. TNReady waxay cabbirraysaa **fahamka** ardayga ee ku aadan imtixaannaadka caadiga ee gobolka ee maadooyinka luqadda Ingiriiska, xisaab, aqoonta bulshada, iyo sayniska, laakin kaliya ma ahan imtixaan gobol. Waa qaab lagu qiimeeyo waxa ardaydeenu ay garanayaan iyo waxa annagu aan u qaban karno oo aan ku caawin karno si mustaqbalka ay u guulaystaan. Sida carruurteenu aan sannad kasta takhtarka ugu geyno oo kale ee la soo baaro, imtixaanka TNReady wuxuu waalidiinta, ardayda, iyo macalimiinta uu u fidiyaa baaritaan sannadle ah si loo xaqiijiyo dhammaan waxyaabaha ardaydu ay soo barteen oo ka dibna horey loo sii socdo, wakhtigooduna aysan ka daba dhicin inay guuleystaan tallaabada xigta ee safarkoodu waxbarasho.

Maxay tahay sababa TNReady?

- Waxay dejinnaysaa xirfaddaha la siman kuwa kuliyadda iyo shaqada waxyaabaha laga filan karo
- Waxay ardaydu ay u ogolaataa inay muujiyaan waxa ay yaqaaniin ee dariiqyada cusub
- Waxay xog wanaagsan ay sii siisaa macalimiinta iyo waalidiinta
- Waxay kor u qaadaa xallinta laylisyada dhabta ah

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 5 aad ee warbixinta habaysan)

Maxay yihiin imtixaannaadka lagu daro oo qayb ka ah imtixaannada TCAP?

TNReady

- Ardayda ku jirta fasalada 3-8 ayaa imtixaanaadkan gala sanad kasta:
    - Maadada luqadda Ingiriisiga
    - Xisaab
    - Aqoonta Bulshada
    - Saynis
- Ardayda dhegata dugsiyada sare waxay qaataan imtixaannada Dhammaadka Koorsada [End of Course (EOC)]:
    - Ingiriis I
    - Ingriis II
    - Ingiriis III
    - Aljabra I ama Xisaab Midaysan I
    - Aljabra I ama Xisaab Midaysan II

    - Aljabra II ama Xisaab Midaysan III
    - Taariikhda & Juqraafiga Maraykanka
    - Kimestiri
    - Bayooliji
- **Bartayaasha luqadda Ingiriiska waxaa looga baahan yahay inay qaataan imtixaannada gobolka. Kuwa kaliya ee aan ku jirin waa ardayda ku jira sannadka koowaad ee uu dhigto ama ay dhigato iskuulka Maraykanka ku yaala. Sidoo kale, waxaa jira isku hagaajin dhanka imtixaannaadka ah ee loogu talagalay ardayda Bartayaasha Luqadda ah [EL] oo adeeg toos ah qaata, adeegyo laga cafiyay, ama loo xisaabiyay inay wareejin ku jiraan inta lagu jiray afarta sanadood ka dib marka ay soo dhammeeyeen barnaamijka ESL ee Barashada Luqadda Ingiriirka.*

Imtixaannada Ardayda Naafada ah
Ardayda dhigata fasallada 3-11 ee qaba naafonimo dhanka fahamka oo daran waxay xaq u leeyihiin qiimayn ka bedelan dhammaan qaybaha afarta ah ee (ELA, xisaab, saynis, iyo aqoonta bulshada)

- Ardayda dhigata fasalka labaad ee degmo dugsiyeedka dhigata ee qaadanaya imtixaannada fasalka labaad ee ikhtiyaariga ah, ardayda qaadanaya Imtixaannada Bedellan ee Fasalka Labaad ee maadooyinka Ingiriiska iyo xisaabta
- Ardayda dhigata fasallada 3-8, ardayda waxay qaataan Imtixaanno Bedellan oo Dhowr Gobol ah (Multi-State Alernate Assessment (MSAA)] ee maadooyinka luqadda Ingiriiska iyo xisaabta
- Ardayda dhigata fasalka 3-8, ardayda waxay qaataan TCAP ee bedellan ee maadada aqoonta bulshada
- Ardayda dhigata fasalka 11, ardayda waxay qaataan Imtixaanno Bedellan oo Dhowr Gobol ah (Multi-State Alernate Assessment (MSAA)] ee maadooyinka luqadda Ingiriiska iyo xisaabta
- Ardayda qaadata saynis ee fasalka 10, ardayda waxay qaataan TCAP ee bedellan ee maadada sayniska

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 6 aad ee warbixinta habaysan)

Gebi ahaan, **sanadkan ardayda wakhti yar ayay ku qarashgarayn doonaan imtixaannaadka gobolka.** Intaas waxa dheer, isku duwida imtixaanka iyo jadwalaynta way ka wanaagsanaan doonaa. Halka ay ka ahaan la'hayd Qaybta I iyo Qaybta II, **imtixaanka waxaa la bixin doonaa hal jeer oo ah marka la gaaro dhammaadka sanad dugsiyeedka.** Si loo yareeyo gebi dhaan saamaynta uu ku yeesho aagga iskuulka, goorta la qaadayo waxay noqon doonaa **mid hal toddobaad ka yar** marka loo eego imtixaanka Qaybta II ee sannadka la soo dhaafay. Oo, halka ay ka ahaan la'hayd imtixaan hoosaadka dheer, **ardayda imtixaanka waxay u qaadan doonaa qayb hoosaadyo yar,** kaa soo inta badan ka yar- mar marka qaarkood xitaa ka yar 30 daqiiqadood- si loogu simo maalmaha caadiga ah ee iskuulka. Inkastoo waaxda ay si joogto ah u raadin doono si loo wanaajiyo imtixaan qaadista gobolka Tennessee, isbedelladan horey ayay noo wadi doonaan.

Maadooyinka Imtixaanka laga Qaadi doono Sanad Dugsiyeedka 2016-17

Imtixaanka xisaabta ee TNReady waxaa ardayda lagu waydiin doonaa inay xalliyaan laylisyo dhowr nooc ah qaar oo waxaa la doonayaa in lagu oggaado xirfaddahooda xallinta laylisyada. Waxaa la'haan doontaa qayb kalkuleetarka la fasaxayo iyo qaybo kalkuleetarka aan la fasaxi doonin.

Imtixaanka maadada luqadda Ingiriiska ee TNReady weli waxaa ku jira qaybta qoraalka, taas oo sannadihii dhowrka ahaa ee la soo dhaafay ku jirtay, laakin qaybo yar-yar ayaa loo kala saaray, qeybo hoosaad oo aad loo maarayn karo oo waxlooga qabannayo welwelka ku saabsan kartida ardayda. Qiimayntan waxaa ardayda lagu waydiin doonaa in jawaabbahoodu ay ku taageeraan caddaymo ka yimaada qoraallada gaaban ee ay akhrin imtixaanka ka akhrin doonaan.

Imtixaanka aqoonta bulshada ee TNReady ee sannadkan waa imtixaan loogu talgalay ardayda dhigata fasallada 3–8 — taas oo ay micnaheedu tahay in buundada aan lagu salayn doonin fasalka ama qaybinta qiimaynta macallinka, laakin waaxda waxay ka caawin doonaa samaynta imtixaannaadka mustaqbalka. Waxay ka koobnaan doonaa su'aallo dhowr oo kala nooc ah. Maadooyinka taariikhda & Juqraafiga Maraykanka waa imtixaannada Dhammaadka Koorsada-markaa natiijooyinka waalidiinta, ardayda, iyo barayaashaba way heli doonaan

Imtixaanka sayniska ee TNReady ee fasalka 3–11 imtixaankii sanadkii tagay ayuu aad ugu eg yahay. Inkastoo ay noqon doonto imtixaan [multiple choice], waaxda waxay qorsheynaysaa inay dib u habayso imtixaanka sanaddaha mustaqbalka si wax looga oggaado waxa ay ardaydu yaqaaniin iyo waxa ay samayn karaan.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 7 aad ee warbixinta habaysan)

Imisa saacaddood ayuu ubadkayga ku qarashgarayn doonaa qaadashada imtixaanka?

Gebi ahaan, ardaydu waxay ku qarashgarayn doonaa qiyaastii in ka yar boqolkiiba 30% ee imtixaannada gobolka ka yar kii sanad dugsiyeedkii 2015-16. Fasallada 3–8, imtixaanka TNReady waxaa laga gaabiyay qiyaastii 200-210 daqiiqadood, waxay ku xiran tahay fasalka. Inta badan imtixaannada Dhammaadka Koorsada waxaa laga yareeyay qiyaastii 40-120 daqiiqadood; imtixaannada Dhammaadka Koorsada kaliya ee aan wax laga bedellin waa imtixaanka baayoolajiga iyo kimistiriga, kaa soo horeyba u ahaa imtixaan gaaban. Jaantuska ku qoran bogga soo socda waxay muujinayaan inta saacad ee ardayda ay ju qarashgarayn doonaa marka ay qaadanayaan imtixaanka gobolka ee sannadkan iyo inta saacadood ee laga dhimay imitaanaadkii sanad dugsiyeedka 2015-16.

Inkastoo degmo dugsiyeedka iyo iskuullaadka ay dhici karto in ay ku daraan imtixaannaad dheeraad ah oo ka duwan kuwa ay u baahan yihiin gobolka, isu-geyn saacadda ardayga uu ku qarashgarayn karo imtixaanaadka gobolka way ka yar tahay boqolkiiba 1% ee sanad dugsiyeedka

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 8 aad ee warbixinta habaysan)

Jaantuska Saacadda Imtixaanka ee 2016-17

Fasalka	Maadada Luqadda Ingiriisiga	Xisaab	Saynis	Aqoonta Bulshada
Fasalka 2	*BIXINTEEDA WAA IQTIYAAR: Dalabka Degmo Dugsiyeedka* Qeyb-hoosaadka 1: 40 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 2: 40 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 42 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 4: 40 daqiiqadood Isu-geyn: 162 daqiiqadood	*BIXINTEEDA WAA IQTIYAAR: Dalabka Degmo Dugsiyeedka* Qeyb-hoosaadka 1: 40 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 2: 42 daqiiqadood Isu-geyn: 82 daqiiqadood		

Fasalka 3	Qeyb-hoosaadka 1: 75 daqiiqaddaha (qorista) Qeyb-hoosaadka 2: 35 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 35 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 4: 50 daqiiqadood Isu-geyn: 195 daqiiqadood 95 daqiiqadood la dhimay	Qeyb-hoosaadka 1: 45 daqiiqadood (kalkuleetar maya) Qeyb-hoosaadka 2: 30 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 40 daqiiqadood Isu-geyn: 115 daqiiqadood 20 daqiiqadood la dhimay	Qeyb-hoosaadka 1: 53 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 2: 51 daqiiqadood Isu-geyn: 104 daqiiqadood ma jiraan wax isbedel ah	Maadada imtixaanka: 50 daqiiqadood Isu-geyn: 50 daqiiqadood
Fasalka 4	Qeyb-hoosaadka 1: 75 daqiiqaddaha (qorista) Qeyb-hoosaadka 2: 35 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 35 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 4: 50 daqiiqadood Isu-geyn: 195 daqiiqadood 95 daqiiqadood la dhimay	Qeyb-hoosaadka 1: 45 daqiiqadood (kalkuleetar maya) Qeyb-hoosaadka 2: 30 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 40 daqiiqadood Isu-geyn: 115 daqiiqadood 20 daqiiqadood la dhimay	Qeyb-hoosaadka 1: 48 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 2: 47 daqiiqadood Isu-geyn: 95 daqiiqadood ma jiraan wax isbedel ah	Maadada imtixaanka: 50 daqiiqadood Isu-geyn: 50 daqiiqadood
Fasalka 5	Qeyb-hoosaadka 1: 75 daqiiqaddaha (qorista) Qeyb-hoosaadka 2: 35 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 35 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 4: 50 daqiiqadood Isu-geyn: 195 daqiiqadood 95 daqiiqadood la dhimay	Qeyb-hoosaadka 1: 45 daqiiqadood (kalkuleetar maya) Qeyb-hoosaadka 2: 30 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 40 daqiiqadood Isu-geyn: 115 daqiiqadood 20 daqiiqadood la dhimay	Qeyb-hoosaadka 1: 48 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 2: 47 daqiiqadood Isu-geyn: 95 daqiiqadood ma jiraan wax isbedel ah	Maadada imtixaanka: 50 daqiiqadood Isu-geyn: 50 daqiiqadood
Fasalka 6	Qeyb-hoosaadka 1: 85 daqiiqaddaha (Qorista) Qeyb-hoosaadka 2: 50 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 50 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 4: 45 daqiiqadood Isu-geyn: 230 daqiiqadood 90 daqiiqadood laga yareeyay	Qeyb-hoosaadka 1: 40 daqiiqadood (kalkuleetar maya) Qeyb-hoosaadka 2: 30 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 55 daqiiqadood Isu-geyn: 125 daqiiqadood 25 daqiiqadood laga yareeyay	Qeyb-hoosaadka 1: 48 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 2: 47 daqiiqadood Isu-geyn: 95 daqiiqadood ma jiraan wax isbedel ah	Maadada imtixaanka: 50 daqiiqadood Isu-geyn: 50 daqiiqadood
Fasalka 7	Qeyb-hoosaadka 1: 85 daqiiqaddaha (Qorista) Qeyb-hoosaadka 2: 50 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 50 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 4: 45 daqiiqadood Isu-geyn: 230 daqiiqadood 90 daqiiqadood laga yareeyay	Qeyb-hoosaadka 1: 40 daqiiqadood (kalkuleetar maya) Qeyb-hoosaadka 2: 30 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 55 daqiiqadood Isu-geyn: 125 daqiiqadood 25 daqiiqadood laga yareeyay	Qeyb-hoosaadka 1: 48 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 2: 47 daqiiqadood Isu-geyn: 95 daqiiqadood ma jiraan wax isbedel ah	Maadada imtixaanka: 50 daqiiqadood Isu-geyn: 50 daqiiqadood

Fasalka 8	Qeyb-hoosaadka 1: 85 daqiiqaddaha (Qorista) Qeyb-hoosaadka 2: 50 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 50 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 4: 45 daqiiqadood Isu-geyn: 230 daqiiqadood 90 daqiiqadood laga yareeyay	Qeyb-hoosaadka 1: 40 daqiiqadood (kalkuleetar maya) Qeyb-hoosaadka 2: 30 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 55 daqiiqadood Isu-geyn: 125 daqiiqadood 25 daqiiqadood laga yareeyay	Qeyb-hoosaadka 1: 48 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 2: 47 daqiiqadood Isu-geyn: 95 daqiiqadood ma jiraan wax isbedel ah	Maadada imtixaanka: 50 daqiiqadood Isu-geyn: 50 daqiiqadood

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 7 aad ee warbixinta habaysan)

Dugsiga Sare Imtixaanka Dhammaadka Koorsada	Saacaddaha	Laga yareeyay
Ingiriis I/II/III	Qeyb-hoosaadka 1: 85 daqiiqaddaha (qorista) Qeyb-hoosaadka 2: 50 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 40 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 4: 45 daqiiqadood Isu-geyn: 230 daqiiqadood	120 daqiiqadood la yareeyay
Xisaab Midaysan I/II/III	Qeyb-hoosaadka 1: 35 daqiiqadood (kalkuleetar maya) Qeyb-hoosaadka 2: 55 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 55 daqiiqadood Isu-geyn: 145 daqiiqadood	65 daqiiqadood la yareeyay
Aljabra I/II	Qeyb-hoosaadka 1: 35 daqiiqadood (kalkuleetar maya) Qeyb-hoosaadka 2: 55 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 55 daqiiqadood Isu-geyn: 145 daqiiqadood	65 daqiiqadood la yareeyay
Joomeytiri	Qeyb-hoosaadka 1: 35 daqiiqadood (kalkuleetar maya) Qeyb-hoosaadka 2: 55 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 55 daqiiqadood Isu-geyn: 145 daqiiqadood	65 daqiiqadood la yareeyay
Bayooliji	Qeyb-hoosaadka 1: 75 daqiiqadood Isu-geyn: 75 daqiiqadood	Ma jiraan wax isbedel ah
Kimestiri	Qeyb-hoosaadka 1: 75 daqiiqadood Isu-geyn: 75 daqiiqadood	Ma jiraan wax isbedel ah
Taariikhda & Juqraafiga Maraykanka	Qeyb-hoosaadka 1: 50 daqiiqaddaha (qorista) Qeyb-hoosaadka 2: 45 daqiiqadood Qeyb-hoosaadka 3: 45 daqiiqadood Isu-geyn: 140 daqiiqadood	40 daqiiqadood la yareeyay

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 9 aad ee warbixinta habaysan)

Waa maxay noocyada su'aallo ee ku jira doona imtixaanka TNReady?

Imtixaannada TNReady heer qota dheer ee aqoon ayaa lagu ogaanayaa imtixaannadii hore ka duwan. Tusaale ahaan, maadooyinka luqadda Ingiriiska ardayda waxay wax ka aqrin doonaan qoraal gaaban oo waxay bixin doonaa jawaab qaar oo qoran ee ay jawaabbahoodu ku taageerayaan.

Imtixaanka xisaabta, ardaydu waxay ka shaqayn doonaan xisaabaad dhor ah, intooda badan iyagoon isticmaalayn wax kalkuleetar ah, si ay u muujiyaan waxyaabaha ay barteen. Imtixaanka TNReady ardaydu waxay siisaa dariiqyo dhowr ah oo ay ku muujinnayaan waxa ay yaqaaniin iyo waxa ay qaban karaan.

Waan ogsoonnahay in macalimiinta ay isticmaalaan waxyaabaha sida laylisyada qoraalka, mashruucyada, iyo su'aallaha la kala xulashada si loo cabbirro waxbarashada ardayga inta sanad dugsiyeedka lagu jiro. Si taas la mid ah, imtixaanka TNReady ardaydu waxay siisaa dariiqyo dhowr ah oo ay ku muujinnayaan waxa ay yaqaaniin. Boggan soo socda waxaad ka arki doontaa su'aallo tusaale ah oo ka yimid imtixaanka TNReady ee dhowr maadooyin iyo fasallo laga soo qaatay. **Jawaabbaha saxda ah middabka liinta ayaa lagu tilmaamay.**

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 9-11 aad ee warbixinta habaysan)

(SU'AALLAHA WAXAA LA GELIN DOONAA QAYBTA KAMA DAMBEYSKA AH)

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 11 aad ee warbixinta habaysan)

Maxaa yihiin aaladaha habdhaqanka ee la heli karo ee ardayga ka caawin karta si uu isu diyaariyo imtixaanka TNReady?

Inkastoo diyaargarowga ugu fiican ee imtixaanka TNReady ay noqon donto cashar bixin fiican oo maalin kasta ah oona fasal kasta in laga bixiyo ah, waan ogsoonnahay in waalidiinta iyo macalimiinta u baahan yihiin aalad dheeraad ah si ardaydu ay ugu diyaariyaan inay guuleystaan. Su'aallaha ku jira imtixaanka TNReady ee sanadkan wuxuu noqon doonaa mid la siman su'aallaha ardayda ay isu diyaarinnayeen inta lagu jiray sanad dugsiyeedkii tagey oo wuxuu la mid noqon doonaa heerarka ardaydu ay wax u bartaan fasalka caadiga ee maalin kasta.

Helitaanka Waalidka ee Su'aallaha ay ku Tabbaranayaan
Su'aallaha imtixaanka TNReady ee lagu tabbabarto bilaha soo socda ayaa waalidiinta waxaa loo soo gelin doonaa qatka internetka oo ay ka heli doonaan. Si joogta ah marwaliba kala soco TNReady.gov si xog dheeri ah aad u hesho.

Imtixaanka Tabbabarka
Macalimiinta way heli karaan imtixaannada lagu tabbarto, kaa soo ku siinaya su'aallooyin tusaale ah ee heer kasta ee imtixaanka ku jira iyagoo u maraya nidaam gudaha ah oo loogu yeero EdTools. Imtixaannaadka lagu tabbabar qaato waxaa heli karaa dhammaan wixi fasal iyo maado kasta ayay hayaan. Macalimiinta waxay u isticmaali karaan imtixaanka lagu tabbar qaato ee fasalka dhexdiisa ah si ardayga ay uga caawiso inuu isu diyaariyo imtixaanka TNReady.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 12 aad ee warbixinta habaysan)

Ardaygeyga ma qatka internetka ayay ka qaadan doonaan imtixaanka TNReady?

Tennessee sannado dhowr ah ayay wadi doontaa qaababkan qatka internetka ah si loo hubiyo in gobolka iyo teknoolajiga maxalliga loogu diyaariyo. Sannad dugsiyeedka soo socdo, **imtixaanka gobolka ee fasallada 3-8 waxaa lagu qaadi doonaa qaab warqad iyo qallin-qore.**

Waaxda Questar ayay si wadajir ah ula shaqayn doonaa, kuwa imtixaannadeena TNReady u soo diyaariya, si loo helo in imtixaannada Dhammaadka Koorsada qatka internetka lagu qaato sida imtixaanka xisaabta, Ingiriiska, iyo Maadooyinka taariikhda & Juqraafiga Maraykanka ee imtixaanka

xiling gu'a haddii barta imtixaanka qatka internetka ee laga galo ay noqoto qaab iskuullaadka ay ku guuleystaan. Hase-ahaatee, dhammaan dugsiyada sare oo dhan ee ku socda jadwalka [block schedule] waxay imtixaannada Dhammaadka Koorsada ku qaadan doonaan warqad iyo qallin-qore.

Xitaa haddii iskuullaadka ay u muuqdaan inay diyaar u yihiin in imtixaanka qatka internetka xiling gu'a lagu qaadan karo, degmo dugsiyeedka weli waxay haysataa ikhtiyaar ah inay kala doorato haddii imtixaannaadka ay warqad iyo qallin-qore uga qaado ardayda sanadkan dhigata dugsiga sare iyo in kale.

Imtixaannaadka maadada baayoolijiga iyo kimistiriga waxaa lagu qaadi doonaa warqad iyo qallin-qore. Ardayda qaba naafanimo aad u daran ee dhanka garashada, MSAA waxay ku qaadan karaan qatka internetka iyo warqad waa ikhtiyaarkood, oo imtixaanka bedellan ee TCAP waxay ku qaadan karaan oo kaliya warqad iyo qallin-qore.

Sideen u caawin karaa ardaygeyga dhigta dugsiga sare si uu isu diyaariyo inuu imtixaanka qatka internetka ku qaato?

Waxbarasho sare, ku dhowaad shaqo kasta, iyo bulshadeena casriga ah, internetka waxaan u isticmaalnaa si shaqooyinkeena aan ugala xiriirno oo howsheena aan u dhammaysano. Waa dariiqa dunnideena ku socoto. Ardaydeenu waa inaan u diyaarinnaa mustaqbalkooda, kaa soo u baahan degsannaan dhanka teknoolijiga. Iyadoo taas maanka lagu hayo, dugsiyada sare waxay la siin doona ikhtiyaar ah in imtixaannada Dhammaadka Koorsada ee xiling gu'a ay qatka internetka ku gali karaan.

Si ardaygaaga aad ugu diyaariso, ku dhiiri-geli inay bilaabaan in maalin kasta oo ay qabayaan howlaha xaaladdaha isku-buuqsanaanta yar ay u isticmaalaan aaladda dijitalka. Ha sugin ilaa iyo imtixaanka laga bilaabayo si ardaygaaga aad uga caawiso inuu barto sida loo isticmaalo kumbiyuurrrada laabtoobka, kombiyuutarkan gacanta, ama kombiyuutar miiska. Sida sannadka la soo dhaafay oo kale, barta ardayda ay imtixaanka lagu tabbar qaato laga helo waa u diyaar in xilliga dayrta ay ku tabbar qaataan.

Waan ognahay in qaar ka mid ah ardayda Tennessee aysan heli karin oo gurigoodu uusan oolin kombiyuutar ama internet uusan la'hayn. Haddii helida internetka ay dhib kugu tahay, waxaan kugu dhiirigelinnaynaa inaad la hadasho maamulaha iskuulkaaga si la idin siiyo fursad ah in ardaygaaga uu kombiyuutarka iskuulka isticmaalo marka iskuulka uu dhammaado. Sidoo kale waxaad tagi kartaa qolka kombiyuutarrada ee maktabbadda dadwaynaha, xarumaha jaaliyadda, iyo/ama halka aad ku cibaadaysataan.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 13 aad ee warbixinta habaysan)

Goormee ayuu ardaygayga qaadan karaa imtixaanka TNReady?

Dhammaan imtixaannaadka TNReady waxaa la qaadi doonaa dhammaadka sanad dugsiyeedka (ama simisterka marka uu u dhammaado ardayda dhigata dugsiga sare ee ku jirta jadwalka [block schedule]). Dhammaan wixii imtixaanno ah hadda waxaa la qaadi doonaa isku mar.

Imtixaanka TNReady waxaa la qaadi doonaa inta u **dhaxayso 17ka bisha Abriil iyo 5ta bisha Maajo,** oo degmo dugsiyeedka jadwalkoodu wuu isbedelli karaa si ay u yareeyaan saamaynta imtixaanka uu ku leeyahay howlaha kale ee iskuulka ka socda. Qeyb-hoosaadka koowaad imtixaanka maadooyinka luqadda Ingiriiska, kaa soo uu ku jiro qoraalka, waxaa la qaadi doonaa inta lagu jiro toddobaadka koowaad ee muddada seddexda-toddobaad. Dugsiyada sare ee la socda jadwalka

[block schedule] ee xilliga dayrta imtixaankooda waxay qaadan doonaan inta u dhaxayso 28ka bisha Nofeembar iyo 16ka bisha Diseembar. Ardayda jadwalka dayrta imtixaanka waxay ku qaadan doonaan warqad iyo qallin-qore.

Imtixaannaadka ardayda naafada ah ee qaba naafo dhanka garashada oo daran, MSAA (xisaab iyo ELA) iyo imtixaanka Bedellan ee TCAP (saynis iyo aqoonta bulshada), waxaa la qaban doonaa muddo laba-bilood ah dhexdooda ee xiling gu'a.

Maxay yihiin taageerrada dhanka imtixaanka ee ardaygeyga uu heli karo si uu u fahmo oo uuna u qiimeeyo su'aallaha imtixaanka?

Sidii hore oo kale, isku hagaajin dhowr ah oo buuxda ayaa la siin doonaa ardaygaaga si imtixaanka looga dhigo mid ay heli karaan dhammaan ardayda ka qaybqaadanaysa oo dhan. Kooxda IEP ga ayaa bixin doonta wixii tilmaamo ah sida loo xulan karo isku hagaajinta ugu haboon ee tan, taas oo la mid ah sannadkii la soo dhaafay.

Waalidiinta dhalay ardayda naafada ah, fadlan booqo TNReady.gov ilmaamo kab ah ee isku hagaajinta iyo u diyaargareynta ardaygaaga ee imtixaanka TNReady.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 14 aad ee warbixinta habaysan)

Goormeen ogaan karaa buundada uu keenay ardaygayga ee imtixaanka TNReady?

Natiijooyinka sanadka koowaad ee imtixaanka TNReady dib ayaa loo dhigi doonaa inta macallimiinta gobolka Tennessee iyo waaxda ay ka dhammaystiri doonaan saxitaanka inta lagu jiro xiliga xagaaga, sidaa-awgeed waxaan filaynaa in buundooyinka rasmiga ee ardayda dhigata fasalka 3-8 ay keeneen xilliga dayrta ee sanadka 2017. Imtixaannaadka Dhammaadka Koorsada, waaxda waxay qorshaynaysaa in natiijooyinka ay qoyska iyo iskuullaadka ay heli karaan xilliga xagayga ee 2017. Inta lagu jiro imtixaan qaadista mustaqbalka, waaxda waxay soo daabici doontaa natiijooyinka fasallada 3-8 ilaa dugsiga sare ee isla jadwalkaas.

Buundooyinka iyo macluumaadka ka soo baxa imtixaannada Dhammaadka Koorsada ee 2015-16 imtixaannaadka gobolka waxaa la heli doonaa dhammaadka sannadka ee xilliga dayrta, sida waaxda ay sannadkii horey u sharaxday. Ardayda qaatay imtixaannada Dhammaadka Koorsada ee maadooyinka luqadda Ingiriiska, xisaab, iyo Maadooyinka taariikhda & Juqraafiga Maraykanka waxay heli doonaan buundo buuxda, warbixinnada buundada cusub ee dib loo habeeyay, kaa soo waalidiinta iyo ardayda siin doona xog wanaagsan. Natiijooyinka ka socda fasalka 3-8 waxay ku eg tahay xog xadidan oo aan dhammaystirnayn-tusaale ahaan, waaxda awoodi doontaa inay la wadaagto inta su'aallo ee ardayga sida saxda ah uu uga jawaabbay, oo ma ahan waxa buundada ay micnaheedu tahay marka laga hadlayo fahamka iyo heerka kobaca ee ardayga.

Sidee baa buundooyinka uu keenay ubadkayga ee imtixaanka TNReady loola barbardhigi doonaa buundooynkii imtixaanka hore?

Sida arday iyo macallimiin ay sare ugu qaadayaan waxyaabaha cusub ee ay ka filan la'haayeen imtixaannaadka cusub, waxaan filaynaa sannadka koowaad ee buundooyinka imtixaanka ee ardayda dhigata fasallada 3-8 ay hoos u dhici doonto goorta loo barbardhigo imtixaannaadka hore ee TCAP. Waxaan filaynaa in natiijooyinka sanadka koowaad ee ka soo baxa imtixaannaadka TNReady in ay noqoto mid calaamad cusub u noqota oo lagu cabbiro horrumarka joogtada ee sanaddaha soo socda. Adiga waalid ahaan, waxaad isticmaali kartaa xogta ka soo baxda imtixaanka si ubadkaaga ay

uga caawiso inta guriga uu joogo oo aad bilawdo in ubadkaaga macallinkiisa aad kala hadasho si loo caddeeyo meelaha ubadkaaga kaalmo uga baahan yahay, haddii uu jiro, taageero dheeraad ah ayaa daruuri ah si loo hubiyo in fasallba fasalka kale uga gudbaan iyaga oo leh aqoon iyo xirfadda ay u baahan yihiin is ay u guuleystaan sannadka xiga iyo wixii ka dambeeya inta ay ku jiraan dugsiga sare iyo wixii ka dambeeya.

Warbixinnada cusub ee waalidiinta waxay ku tusin doonaa xog wanaagsan oo badan oo kii hore ka badan, oo waalidiinta la siin doono mar haddii la dhammeeyo howlaha saxitaanka. Ardayda gasha imtixaannada Dhammaadka Koorsada inta lagu jiray sanad-dugsiyeedka 2015-16, waalidiintooda iyo macalimiintooda warbixinta waxay heli doonaa dhammaadka xilligan dayrta. Maadooyin kasta waxaa loo kala qaybin doonaa qaybo kala duwan ee xirfaddo lagu muujinnayo halka ardayga uu ku wanaagsan yahay ama uu kaalmo dheeraad ah uga baahan yahay iyo sida natiijooyinkoodu loo barbardhigi karto ardayda kale ee asaaggiisa ah ee la dhigta iskuulkooda, degmo dugsiyeedkooda, iyo kuwa gobolka Tennessee. Bogga xiga, waxaad arki doontaa tusaale ah warbixinnada waalidiinta loogu talagalay ee imtixaanka TNReady.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 15 aad ee warbixinta habaysan)

(WAXAA KU JIRI DOONAA TUSAALOOYINKA EE NOOCA KAMA DAMBEYSKA)

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 16 aad ee warbixinta habaysan)

Sidee loo go'aamin doonaa buundooyinka TNReady?

Hanaanka saxitaanka

- Kuwa degmo dugsiyeedka ay soo celisay
- Dukumentiyada oo dhan Quester ayaa sawirraya
- Warqaddaha imtixaannada gacan ayaa lagu saxayaa
- Heerka goobta caadiga ee lagu qabanayo
- Xogta TVAAS ee la hayo
- Natiijooyinka ardayda ee la soo saaray

Waa maxay heerka goobta caadiga?
Waxqabadka dhabta ah ee ardayga ayaa go'aaminnaya halka halka su'aallaha ay ku soo ay ku beegmaan kan ugu yar ee ugu adag iyo kan ugu adag; taas ayaa ah sababta kaliya ee aad u samayn karto heerka goobta caadiga ka dib marka adaygaaga imtixaanka uu galo ka dib.

Innagoo ku salaynayna qeexitaanka guddiga ee waxa ardayga looga baahan yahay inay ogaadaan iyo waxa ay awooddaan inay sameeyaan ee heer kasta, barreyaasha gobolka Tennessee ayaa su'aal kasta eegi doona, si ay u go'aamiyaan halka u dhaxayso ee heerka aqoonta. Hanaanka waxaa loogu yeeraa heerka goobta.

Waa maxay buundada halka u dhaxayso?
Waxqabadka halka laba heer ay ku kulmaan ayaa loogu yeeraa buundada baasitaanka iyo dhicida ay kula baxaan. Seddexda buundooyinka halka ay iska jaraan ee waxqabadka afarta heer.

Waa maxay heerka waxqabadka?
Halka ay ku kala baxaan ee buundada ugu yar ardaygu waa inuu keenaa si loogu texgeliyo heerka waxqabad gaar ah.

Heerarka waxqabadka lama mid aha wax ardayga uu yaqaano; laakin, waa heerarka waxqabadka waxaa loo isticmaalaa in la go'aamiyo aqoonta ardayga.

(Kan waxaa laga heli karaa bogga 17 aad ee warbixinta habaysan)

Sidee ayuu heerarkan cusub uu u saamayn doonaa imtixaanka TNReady?

Macalimiinta Tennessee iyo jaaliyadda guud ee waxbarashada waxay dib u habbaynaayeen heerarka waxbarashada gobolkeena ee maadooyika xisaabta maadooyinka luqadda Ingiriiska inta lagu jiray sannadihii la soo dhaafay. Heerarkan cusub waxaa si buuxda loo howlgelin doonaa iskuulaadka Tennessee inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2017-18, iyadoo ay la socoto tabbar kaa soo bilaaban doona inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2016-17 si macalimiinta uu uga caawiyo inay isudiyaariyaan. Hase-ahaatee, imtixaanaadka TNReady ee sanad dugsiyeedka 2016-17 waxay la mid yihiin heerarka caadiga ee macalimiinteena ay wax u barayeen sanadihii dhowrka ahaa, oo ma ahan heerarkan cusub.

Heerarka waxbarasho ee maadada sayniska iyo maadada aqoonta bulshada ayaa sidoo kale dib loo eegayaa. Sida ay ku socoto jadwalkan iminka jira, heerarka cusub ee sayniska wuxuu bilaaban doonaa sanad dugsiyeedka 2018-19 iyo maadada aqoonta bulshada waxay bilaaban doontaa sanad dugsiyeedka 2019-20. Imtixaanka TNReady waa imtixaan Tennessee u gaar ah ee loogu talagalay in si sahlan loo qaato inta ay socoto si markaa loo cabbiro heerarka cusub. Inta uu sii jiro heerarka gobolka, imtixaanka TNReady na wuu sii socon doonaa.

Ka waran haddii weli aan su'aallo qabo?

Waa laga yaabaa in weli aad qabto su'aallo ku saabsan imtixaanka TNReady ee sanad dugsiyeedka 2016-17, oo waxaan diyaarinnay qayb ka hadlaysa su'allaaha inta badan la iswaydiiyo oo aad kala soo bixi kartaa bogga internetka ee TNReady.gov. Haddii aad weli dareensan tahay in aad qabto su'aallo aan weli lagaaga jawaabin, su'aasha waxaad noogu soo gudbin kartaa foormka ku qoran qaybta hoose ee bogga ku qoran su'aallaha inta badan la iswaydiiyo. Su'aashaada waxaa lala doonaa annaga iyo qof kale oo jooga waaxda oo ku siin doona jaawaab dhanka emailka lagu soo diri doona iyo waxaa kaloo lagu siin doonaa wixii ilo dheeraad ah ee laga yaabo in ay waxtar kuu leeyihiin.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 18 aad ee warbixinta habaysan)

Shanta Shey ee loo Baahan yahay in la Ogaado ee ku Saabsan TNReady

1. Gebi ahaan, ardaydu waxay ku qarashgarayn doonaa qiyaastii boqolkiiba 30 in ka yar wakhtiga ay ku qaadato qaadashada imtixaannaadka gobolka ee maadooyika xisaabta, aqoonta bulshada, maadooyinka luqadda Ingiriiska, iyo sayniska ee sanadkan.

2. Imtixaanka TNReady waxaa ku jira su'aallo aad u ad-adag oo la siman waxa macalimiinta ay wax barayaaan maalin kasta oo waxay cabbirraysaa qoraalka ardayga, fekirka daruuriga ah, iyo xirfaddaha xallinta laylisyada.

3. Kuwa ku jira fasallada 3-8, TNReady waxaa la qaadi doonaan iyadoo la isticmaalayo warqad iyo qallin-qore oo ay ka shaqaynayaan si ay u bixiso in qatka internetka ay ka qaataan imtixaanaadka dugsiyada sare.

4. Imtixaanka hal qayb ayaa la bixin doonaa inta lagu jiro muddo seddex-toddobaad inta u dhaxayso 17ka bisha Abriil iyo 5ta bisha Maajo.

5. Xogta ka timaada imtixaanka TNReady waxay muujin doontaa sawir wayn ee ku aadan go'aanka ah sida ardayda ay wax u baranayaan marka loo barbardhigo kuwa asaaggooda ah oo gobolka Tennessee oo dhan ku baahdasn, iyo xog wanagsan oo ku saabsan kartida, baahida, iyo meelaha kale ee ardayda uga baahan yahay inuu koboco.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 19 aad ee warbixinta habaysan)

Liis warbixineedka waalidka ee imtixaanka TNReady

1. Ubadkaaga ka caawi inuu isu diyaariyo si uu wax u barto: iska xaqiiji in ubadkaaga uu maalin kasta iskuulka uu aado isga oo si fiican u nastay oo uu diyaar u yahay inuu loolan cusub galo.

2. La kullan macallinka ubadkaaga: Wax ka waydii ubadkaaga kartidiisa iyo meelaha uu uga baahan yahay in laga kobciyo iyo sida aad u kaalmayn karto inta guriga aad joogtaan.

3. Ubadkaaga la hadal: Iyaga jawaabcelin ka hel maadooyinka ay iyagu aadka ugu fiican yihiin iyo maadooyinka iyaga ku adag oo dhibka ka haysto.

4. Ubadkaaga loolan geli: Goorta ubadkaaga uu samaynaayo layliska guriga ama uu isu diyaarinnayo oo uu baranaya imtixaanka fasalka looga qaado, waydiiso inuu kuu sharaxo waxa ay baranayaan oo iyagu macalin ha kuu noqdeen.

5. Adigu noqo qofka qaangaarka ah ee wax baranaya: Ubadkaaga ha ku arko adiga oo wax cusub baranaya oo wax kugu cusub la qabsanaya, ha noqo xog cusub oo aad baranayso ama xirfad cusub.

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 20 aad ee warbixinta habaysan)

Qaamuus yare

Buundooyinka Halka ay iska Gooyaan: buundada ugu yar ardaygu waa inuu keenaa si loogu texgeliyo heerka waxqabad gaar ah.

Heerka Waxqabadka: waxaa loo isticmaalaa si loo go’aamiyo aqoonta

Imtixaanka Tabbabarka: su'aallo dhowr ah oo matala heer ama waxbarasho ahaan waxa la filan karo oo imtixaanka dhabta ah la qiimayn doono

Warbixinta: sida aan u wadaagno faahfaahinta ku saabsan waxqabadka ardayga ee ku aadan imtixaanka TCAP

Wakhtiga Fadhiga: caddada saacad ee ardaydu ay ku qarashgareeyaan qaadashada imtixaanka

Heerarka: waxa aan fillayno in ardayda ay garanayaan oo ayna awoodi karaan in ay sameeyaan dhammaadka fasalka ama sanad dugsiyeedka

Heerarka Fadhiga Caadiga: haanka barayaasha Tennessee ee lagu eegayo su'aal kasta oo na lagu go'aaminnaya halka ay ku eg tahay heer kasta ee heerka ardayga waxa uu garanayo.

TCAP: Barnaamijka Qiimeynta Faahfaahsan ee Tennessee, kaa soo ku jira dhammaan imtixaannada gobolkeena oo dhan. TNReady wuxuu qayb ka yahay imtixaanka TCAP.

Muddada imtixaanka: taariikhaha ay degmo dugsiyeedka u dooratay inay qaado imtixaanka TNReady; ardayda qayb kaliya ee muddada imtixaan qaadashada ayay ku qorashgarayn doonaan qaadashada imtixaanka

TNReady: waa imtixaan cusub, oo fiican oo gobolka isla leh oo ku jira su'allo la mid ah waxyaabaha ardayda laga filayo inay yaqaaniin iyo waxyaabaha ay ka jawaabi karaan ku jira si markaa ay ula socdaan tallaabooyinka la rabo inay sii wadaan safarkooda waxbarasho ee ay ku jirto imtixaannada muhiimka ah ee gobolka sida maadada xisaabta, maadooyinka luqadda Ingiriiska, aqoonta bulshada, iyo sayniska ee fasallada 3-11

(Qoraalkan waxaa laga heli karaa bogga 21 aad ee warbixinta habaysan)

Illaha

Ardaygaaga macalinkiisa/eeda ayaa markastaaba ah isha kugu wanaagsan oo aad wax ka waydiin karto imtixaanka TNReady.

Boggan internetka ee soo socda ayaa ah halka lagula talinnayo in aad booqato si aad uga hesho xogtii ugu dambaysay ee imtixaanka TNReady:

Bogga internetka ee Waaxda Waxbarashada ee Tennessee waxay ahmiyad-saartay xogta iyo ilaha la xiriira imtixaaanka TNReady:
www.tnready.gov

Waaxda Waxbarashada ee Tennessee's Bogga internetka [Website qeyb qofka details ku saabsan waxbarasho standards Ulajeeddadu all subjects iyo fasalka levels:
www.tn.gov/education/topic/academic-standards

Waaxda Waxbarashada ee Tennessee's blog site, which features taageerada go'aankan iyo boorinta stories:
www.tnclassroomchronicles.org

Koontada Twitterka ee Waaxda Waxbarashada ee Tennessee: www.twitter.com/TNedu

Koontada Faceboogga ee Waaxda Waxbarashada ee Tennessee:
www.facebook.com/TennesseeEducation